## MAXAY ARDAYDA IYO WAALIDIINTU KA FA'IIDAYAAN WAXAN ?

Waxa suurta gal in qof walbaa ka faa'iido. Dugsiyadu waxay sii wanaajin karaan fahamka waxayna garan karaan baahida arday gooni ah ama kooxo arday ah. Waxaa kale oo ay qorsheyn karaan ayna jiheyn karan deeqaaha, waxayna wax u kalmeyn karaan si saameyn leh. Faa'iido aya ugu jirta waalidiinta iyo ardayda haddii ay iskuuladu hayaan warbixino lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan higsiga ardaydooda iyo waxyaalaha ku hor aaddan horumarka. Waaxda xirfadaha iyo waxbarashadu (DfES) waxay siwanaagsan usii fahmi karaan  baahida deegaanka, waxayna u jiheynayaan deeqaha si saameyn leh.

## WAA MAXAY SABABTA AADAN USOO QAADANEYNIN WARBIXIN KU SAAABSAN DIINTA?

Iskuulo badan ayaa ururiya warbixino ku saabsan diinta. Waaxda xirfadaha iyo waxbarshadu (DfES) waxay ogtahay tahay  in noocyada asal ee qaranku aanay koobikarin dhinacwalba oo ku saabsan dareenka aqoonsi ee gaarka ah. Tirada warbixinada ee la ururinkaro ee ku salaysan hab qaran, xad ayey leedahay. Qaybaha noocyada heerka qaran ah oo ay waaxda xirfadaha iyo waxbarashadu (DfES) nabarayso waxay ku kooban tahay mid wax nooga sheegaysa asalka.

## MA HELI KARAA TARJUMAADO QORAALKAN AH?

Haa. Si fudud u waydiiso iskuulka ilamahaaga. Arji codsi ah oo la jeexanayo ayaa halkan laguugu hayaa. Fadlna weydiiso dugsigaaga inay nala soo xidhiidhaan haddii aad u baahan tahay warbixitan oo ku qoran farta loogu talagalay dadka aragga naafada ka ah (indhoolayaasha)

Copies of this publication can be obtained from:

DfES Publications
PO Box 5050
Sherwood Park
Annesley
Nottingham NG15 0DJ.
Tel: 0845 6022260
Fax: 0845 6033360
Textphone: 0845 6055560
email: dfes@prolog.uk.com

Please quote ref: DfES/0263/2002

© Crown copyright 2002

Produced by the Department for Education and Skills

Extracts from this document may be reproduced for non commercial education or training purposes on the condition that the source is acknowledged.

# *Waxyaalaha ay waalidiintu u baahana yihiin inay ka ogaadaan ururinta macluumaadka asalka jinsi ee ardayda dusiyada.*

Qoraalkan waxaa loogu tala galay inuu sharaxo sababta ay iskuuladu u ururiyaan macluumaadka ku saabsan asalka jinsi, ee ardadooda iyo sida loo isticmaalayo macluumaadka.

department for
**education and skills**

## WAA MAXAY SABABTA AY DUGSIYADU U URURINAYAAN WARBIXINTAN?

Schools have collected information on the ethnic background of their pupils since 1990. This is one element of data that schools must report as a statutory requirement to the Department for Education and Skills (DfES). This is reported through the Pupil Level Annual Schools' Census (PLASC) each January.

## HUBAASHII DUGSIYADU HOREY AYEY U HAYSTEEN WARBIXINADAN?

Waa la bedelay noocyadi asal-jinsiyeed ee horay loo isticmaali jirey. Noocyada cusubi waxay ku salysan yihiin kuwi la isticmaalay tirakoobki dadweynaha ee qaranka ee 2001.

## HOWSHAN MA WAXAA LOOGU TALA KOOXAHA KA SOO JEDA JINSIYADAHA LAGATIRO BADAN YAHAY OO KELIYA?

Tan waxaa loogu tala galay dhammaan ardayda. Qofwalbaa wuxuu kasoo jeedaa qolojinsi ah. Macluumaadku waxay iftiimin karaan (daaha ka qaadi karaan) natiijooyin la yaableh oo ku saabsan sida ay kooxaha kala duwani wax u qabtaan una higsadan. Jinsiyadaha kasoo jeeda kuwa lagatiro badan yahay way kaalmeyn karaan dugsigyada, hay'adaha waxbarshada ee dowladaha hoose, iyo dowladdu waxay muujinayaan baahida ardayda oo dhan, wax walba oo asal-jinsiyoodkoodu yahay, waxayna hubiyaan in ay ardaydu helaan kaalmada ay u baahan yiniin, si ay u gaadhaan waxyaabaha u suurtagelikara oo dhan. Iyadoon la helin ilaalin asalka kasoo jeeda kuwa laga tiro badan yahay oo saameyn leh, oo ku wajahan heer qaran ama deegaan, waxaa dhici karta in baahida gaarka ah ee koox uun aan la ogaan Karin.

## YAA ISTICMAALAYA WARBIXINTAN?

Dugsiyada iyo hay'adaha waxbarashada dowladda hoose ayaa isticmaalaya warbixintan, si ay u ogaadaan in koox jinsi gaar ahi aanay u higsaneyn in la mid ah intii ay awoodi kareen, iyo haddii loo baahan yahay kaalmo dheeraad ah. Waaxda xirfadaha iyo waxbarashadu (DfES) waxay u baahan yihiin warbixin ka kaalmeysa sidii ay u qorsheyn lahaayeen, una qoondeyn lahaayeen deeqaha si sare loogu qaado heerka dhammaan ardayda. Waxay kaloo ka caawisaa waaxda xirfadaha iyo waxbarshada (DfES) in intee le'eg ayey dugsiyada iyo hay'adaha waxbarshada ee dowladda hoose ku guulaysteen inay daboolaan baahida koox gaar ah oo ardayda ka tirsan. Waxaa ku cad baadhitaano la sameeyey in koox jisiyad ahi aanay wax u qaban in le'eg inta ay kuwa kale qabtaan waxaa kale oo caddaatay in qaabka higsiga ee gabdhaha iyo wiilashu kala duwan yahay. Warnixin qaran oo sax ahi waxay naga caawinaysaa in la lalasocdo hababka isbedelaya ee waxbarshada, waxay ka kaalmeynaysaa waaxda inay ogaato isbedelada, ayna wax u qorsheyso si saameyn badan leh.

## YAA KALE OO HELAYA OGOLAANSHO AY KU ARKAAN WARBIXNADA KU SAABSAN ILMAHAYGA?

Dugsiyada, hay'adaha waxbarshada ee dowladda hoose, iyo waaxda xirfadaha iyo waxbarshada waxaa xaddidaya (qabanaya) xeerka dhowrista macluumaadka. Tan macnaheedu waxa weeye awood uma laha in ay daaha uga qaadaan qolo seddexaad warbixino laga hayo ilmahaaga. Ilaalin ayaa jirta lagu hubinayo inaanay suurtogal noqon in la garto arday gooni ah oo lagu soo daabacay macluumaadka tirikoob qaran.

## SIDEE AYAA WARBIXINTAN LOO ISTICMAALAYAA?

Lafogurista (baaritaanka) warbixinadan waxay dugsiyada ka caawin kartaa inay ilaaliyaan ayna hagaajiyaan waxqabadkooda iyo inay sidoo kale u dabbaaldegaan guulaha ay ardaydoodu gaareen.

Dugsiyadu waxay awood u yeelan doonaan inay u isticmaalaan warbixintan:

- Inay ku arkaan waxqabadka kooxo kala duwani sameeyaan imtixaanada;
- Inay ku ilaaliyaan kareebista, iyo imaanshaha si loo hubiyo inaanay koox gaar ahi ka maqnaan dugsiga;
- Inay hubiyaan in dhammaan ardayda loola dhaqmo si caddaalad ah.

## MA WAAJIB BAY IGU TAHAY INAAN WARBIXINTAN DHIIBO SANNADWALBA?

Maya. Warbixintan waxaa inta badan la ururiyaa markay ilmuhu dugsiga bilaabayaan. Tixraacyada cusub ee kombiyuuratka lagu sameeyey ayaa keenaya (sababaya) in aanay daruuri noqon in mar kale lagu weyddiyo. Munaasabaddan, dhammaan dugsiyada ayaa ururinaya warbixintan, si loo soo bandhigo noocyo cusub oo ka yimid waaxda xirfadaha iyo waxbarashada DfES. Muddo markii la joogaba waxaa lagu weydiin doonaa inaad hubiso warbixintan iyadoo loola jeedo sax ahaanshaheeda. Tan waxay ku siin doontaa fursan aad ku bedeshid gelista haddii aad rabtid. Waxaa kale oo aad weydiisan kartaa waqti walba inaad aragtid macluud shaqsiyeedka ay dugsiyadu hayaan, waxaadna weydiisan kartaa in laga saaro ama la bedelo warbixin ku saabsan asalka jinsi.

## WAA MAXAY SABABTA UU DUGSIGA ILAMAHAYGU U WEYDIIYEY ISAGA/IYADA INAY KEENAAN WARBIXINTAN ?

Wakiil hay'adeedka warbixintan ( oo horay loogu yaqaanay diiwaan geliyaha ilaalinta macluumaadka) ayaa ku taliyey in dadka da'doodu u dhaxeyso 11-15 ay yihiin kuwa gaadhay da'dii ay ku go'aamin lahayeen aqoonsiga jinsigooda. Waxaad sameyn kartaa inaad kala hadashid ilmahaaga arrimaha lagaga hadlay qoraalkan ka hor intaanay buuxin arjiga. Dadka da'da yar ee jira 16 ama ka badan way awoodi karaan inay gaaraan go'aamadooda gaarka ah. Shaqsiyaadku waxay leeyihiin xaq ay ku weydiistaan inay ku arkaan macluumaadka gaarka ah ee dugsiyadu iyaga ka hayaan, waxayna weydiisan karan in la bedelo ama laga saaro warbixinada ku saabdan asalkooda jinsi.